

Warbixin ku socota dadka codsanaya isukeenidda qoys ee Norway

In loo guuro waddan cusub waxa lagala kulmaa fursado cusub iyo hawlo adag oo aan la ogeyn. Waa muhiim markaa in la helo aqoon ku saabsan waddanka cusub si loogu noolaan karo sida ugu fiican. Waxa wax laga xumaado ah in qaar ka mid ah dadka u soo guurey Norway ey ku dhacaan xaalado adag. Markaa waa muhiim in la ogaado sidii loo waajihi lahaa. Warbixintani waxey wax ka taabanaysaa dhibaatooyinka ku dhici kara qaar ka mid ah dadka u soo guurey Norway.

Sharciga

Sharciga Norwiiijiga wuxuu khuseeyaa dhammaan dadka deggan Norway. Haddii uu jiro iskhilaaf u dhexeeya sharciga norwiiijiga iyo sharciyada diimaha, waxaa markasta soconaya sharciga norwiiijiga. Sinnaanta ragga iyo dumarku waa qiime asaasi ah Norway, wuxuuna ku qorayahey sharciga norwiiijiga. Ragga iyo dumarku waxey xaq u leeyihiin fursado isku mid ah oo waxbarasho, shaqo iyo dhaqan iyo horumar xirfadeed. Takoorid ku saleysan diin, isir ama jinsi lama oggola.

Guur

Xaasas badan waa mamnuuc. Waa mamnuuc in la qabo wax ka badan hal qof. Xaasas badan oo mar la wada qabo waxa lagu muteysan karaa ciqaab ah xadhig. Haddii dhowr xaas lagu soo guursadey waddan dibedda ah, mid keliya ayaa xaq u leh isukeenidda qoyska ee Norway.

Sida uu qabo sharciga Norway waa waajib in labada isqabaa ey masruufaan naftooda iyo carruurtoodaba. Dadka isqaba waxaa xataa waajib ku ah iney is wargeliyaan si ey u qiimeyn karaan dhaqaalaha qoyska.

Guur khasab ah

Guurka ikhtiyaariga ah oo keliya ayaa laga ogolyahey Norway.

Guurka khasabka ah waxaa lagu muteystaa ciqaab.

Heshiis ku saabsan guur oo ey galaan waalidiinta ama dadka kale ee waaweyn oo ey u sameeyaan caruurta da'doodu ka yartahey 18

sannadood kama shaqeynayo Norway. Qofka ku khasba ama ku cadaadiya qof kale inuu guursado, waxa lagu ciqaabi karaa xadhig. Guur la isku khasbey looma aqoonsanayo inuu u noqdo gundhig qoyska oo la isu keeno.

Furriin

Dumarka iyo raggu waxey leeyihiin xuquuq isku mid ah markey noqoto in la isfuro.

Sharciga furriinka ee noorwiiijiga ma takoorayo marka loo eego jinsiga, koox ka tirsan jinsiyad gaar ah ama diin, marka laga hadlayo xaq loo leeyahay furriinka ama isla xisaabtanka dhaqaale ee furriinka kadib.

Furriin ka dhacey Norway in laga aqbalo waddamo kale waxey ku xidhan tahey sharciyada u yaalla waddankaas. Xeerarka ku saabsan daryeelka maalmeed iyo masuuliyadda carruurta furriinka kadib waa isugu mid labada waalid.

Carruur

Carruurta waxey leeyihiin xuquuq u gaar ah Norway

Marka loo eego sharciga norwiiijiga dhammaan dadka da'doodu ka yartahey 18 sannadood waa carruur. Dhammaan carruurta waxey leeyihiin xuquuq u gaar ah oo madaxbannaan, waxeyna xaq ugu leeyihiin waalidkood daryeelka ey u baahan yihiin. Carruurta waxey xaq iyo waajib u leeyihiin iney dugsii dhigtaan laga bilaabo sannadka ey buuxiyaan lix sano ilaa inta ey ka dhameynayaan sannad dugsiiyeedka tobnaad. Waalidka waxaa waajib ku ah iney u diraan carruurta dugsiga.

Haddii ey carruurta ku nool yihiin xaalad dhaawici karta caafimaadkooda ama horumarkooda waxey masuuliyiintu qaadayaan talaabo waxqabad. Lama ogola in carruurta la ciqaabo jidh ahaan. Taa macnaheedu waxa weeye tusaale ahaan lama ogola in carruurta la dilo.

Xoog wax ku muquunin (Vold)

Dhammaan dadka xoog wax loogu geysto waxey xaq ugu leeyihiin dawladda Norway iney siiso caawimo. Waxey tani khuseysaa oo

kale dadka ey dhibaato u geysteen xubno ka mid ah qoyskooda

In xoog lagu muquuniyo qoyska ciqaab baa lagu mudan karaa Norway, booliskuna wuxuu u arkaa muhiim inuu baadhay iyo dabagal ciqaabeed ku sameeyo xoog muquuniska qoyska. Xoog ku muquuninta dhinaca jidhka iyo maskaxda waxaa lagu ciqaabi kara xadhig, sidoo kale waxa Norway ciqaab lagu mudan karaa hanjabaadda, khasabka iyo daryeel la'aanta. Qofka kula kaca xoog ku muquunin sida qofka uu qabo ama carruurta, waxa lagu ciqaabi karaa xadhig ah 8 sannadood. Dhibaataada xoog wax ku muquuninta ah ee loo geysto xubnaha qoyska waxa lagu heli karaa ciqaab ka adag xoog muquuninta kale.

Dumarka la siiyey ogolaansho joogitaan Norway oo ku saleysan isukeenid qoys ee ninkooda ama lammaanahooda, waxey codsan karaan ogolaansho joogitaan oo u gaar ah haddii loo geystey faraxumeyn ah dhinaca jidhka ama maskaxda. Tani waxey khuseysaa xataa haddii aaney weli la nooleyn ninka.

Sida caadiga ah waxa la codsan karaa ogolaansho degaansho kadib marka qofka uu

ku joogey dalka oggolaasho ku saleysan isukeenid qoys muddo 3 sanno ah.

Kala xidhiidh booliska telefoonka 112 si lagaaga caawiyo xaaladaha xoog ku muquuninta ee degdega ah. Dumarka loo geystey dhibaato xoog ku muquunis ah noocey doonto ha ahaato waxa kale oo la xidhiidhi karaan rugta dadka dhibaataada culus heysato (krisesenter).

Rugtu waxey ku deeqdaa ilaalin iyo caawimo la siiyo dumarka la soo faraxumeeyey.

Naafeynta xubinta taranka

Dhammaan noocyada gudniinka waa ka mamnuuc Norway, xataa kan sunnaha ah. Marka loo eego sharciga Norway dhammaan noocyada gudniinka dumarku waa naafeeyn xubin taran. Qofka sameeya ama ka qeybqaata naafeyn xubin taran waxa lagu ciqaabi karaa xadhig ilaa 8 sannadood ah. Sharcigu wuxuu khuseeyaa dhamaan dadka deggan Norway, inkasta oo gudniinka lagu sameeyo waddan dibbedda ah. Masuuliyiinta caafimaadku waxey siin karaan talo iyo caawimaad dadka hore loo soo gudey.

Waxtar leh in la ogaado

Fiise

Norway waxey ka mid tahey wadashaqeynta-Schengen. Fiisaha lagu booqanayo waddamada Schengenka waxa lagu bixiyaa shuruud ah in uu codsadu ka baxayo dalka kahor inta aanuu fiisuhu dhicin. Haddii aad sii joogto Norway in ka badan muddada fiisaha waa lagaa masaafurin karaa waddanka. Waxaad xataa dhibaato la kulmi kartaa marka dambe ee aad soo codsato fiise ama ogolaansho joogitaan.

Fiisaha booqashadu kuuma fasaxayo inaad Norway ka shaqeyso. Wixii war ah ee dheeraad ah ee ku saabsan fiisaha waxaad ka heli kartaa safaaradaha Norway.

Ogolaansho joogitaan iyo shaqo

Waxaad saldhigyadda arrimaha dibedda ee Norway ka soo codsan kartaa ogolaansho joogitaan iyo shaqo. Haddii aad leedahey 3 sano oo waxbarasho xirfadeed ah kadib markaad dhameysey dugsiga dhexe waxaad soo codsan kartaa ogolaansho shaqo sida qof takhasus leh.

Ogolaanshaha joogitaan ama shaqo ee Norway waa in sida caadiga ah la cusbooneysiyo sannad kasta. Saddex sannadood kadib waxa la codsan karaa ogolaansho degaansho.

Ogolaanshaha degaanshuhu ma laha waqti xaddidan sidaa darteed uma baahna in la cusbooneysiyo. War dheeraad ah waxaa ku siin kara safaaradaha Norway. Sidoo kale eeg www.udi.no.

Norway

Degmooyin badan ayaa waxey leeyihiin gadhwadeeno qaxooti (qof ku haga). Gadhwadeen qaxooti waa qof si ikhtiyaari ah u caawiya ajinebiga iyo qaxootiga oo siiya talooyin iyo tilmaamo waxqabad ah. La socodka gadhwadeen qaxooti waxaad si fiican u baran kartaa dadka meesha kula deggan iyo bulshada noorwiijiga, waxa kale oo aad baraneysaa ku hadalka afka noorwiijiga. Habkani waa bilaash. La xidhiidh degmada si aad u hesho war intaa ka badan.

Degmooyinka badankoodu waxey bixiyaan barashada luqada noorwiijiga ee loogu talagaley ajinebiga. La xidhiidh degmada si aad u hesho war intaa ka badan.

Warbixin meelaha lala xidhiidhi karo

- Selvhjelp for flyktninger www.seif.no
- Laanqeyrta cas ee Olso (Oslo Røde Kors) Wuxuu talo iyo caawimo ka bixiyaa guurka khasabka ah
Telefoon 815 55201 (saacada 09-18)
- www.krisesenter.com waxaad ka heleysaa cinwaannada iyo telefoon-nambarada dhan ee rugaha dadka dhibaataada culusi heysato ee Norway.
- Aetat – Caawimo si aad shaqo u codsato. La xidhiidh aetat meesha aad deggantey ama www.etat.no
- Agaasinka Ajinebiga (UDI):
23 35 15 00 – www.udi.no
- Booliska: 02800
- Xaaladaha degdega ah:
Dab tlf 110, boolis tlf 112, dhooli (anbalas) tlf 113.